

## MA JALBEEBAN KARO CEEBAHAAD JAADOW LEEDAHAYE

Gabaygani wuxuu ka mid yahay suugaanta uu hal abuuray MMX (Gaani) oo gabayadiisu sida badan ay ka hadlaan dhaqanka sharafta leh ee Soomaalida iyo dibindaabayada lagu hayo rag iyo dumar-ba. Gabaygani sida ciwaankiisaba ka muuqata wuxuu si kooban u tibaaxayaa Saamaynta gurracan ee qaadku u geysto arrimaha dhaqanka, Dhaqaalaha iyo Bulshada intaba, wuxuuna soo xiganayaa aragtida shareecada Islaamka iyo cilmiga saynisku ay ka qabaan, wuxuuna ku bilaabanayaa sidan.

Ma jalbeeban karo ceebahaad jaadow leedahaye  
Jilbahayga uma laabin abid raamsashada jaane  
Waxaan kaaga jeensadey bal maan jiimka ka higaadsho

Jannadii hageeyiyo ILAAH meel jimcoon badane  
Jarabariddi yaa waalidkay iiga digey jaade  
Jebin-waaga ballantoodi baan kaaga jeensadaye

Jalaalaynka kuma arag inaad jaanib khayr tahaye  
Sayniskuna Daroogaa jirtuu sheegay jeer hore e  
Maandooriyaha kugu jiraan kaaga jeensadaye

Iyadoo Ilmuhu Jeel u qabo Jalammaddii shaaha  
Jooraatigaan soo heloba jaad ku gaditaanku  
Jariimiyo inay denbi tahaan kaaga jeensadaye

Jaal iyo Akhyaar culus haddii aan jid wada hayno  
Rag jalbeebtan aan leennahoo goobta ila jooga  
Jaqlaadii Islaamaha gadaan kaaga jeensadaye

Jimic baad ku heli goorta hore jaalle iga qaade  
Jawaankii markaad marisay oo saacad laga joogo  
Jagayntiyo halkaa ii dhig baan kaaga jeensadaye

Nin weyn oo la jiidjiidayoo loo qabsaday jaadki  
Dhulku inu juqsiiyoo lequu marar jeclaystaaye  
Inaadan sharafta iga jiirin baan kaaga jeensade

Meel aadan joogteen haddii aanad cunin jaadka  
Jaqafiyiyo sandaqadaad u fili jawhar iyo luule  
Halka jilibka loo dhigay raggaan kaaga jeensadaye

Markaad jaadka gadan iyo markay goobta kulajoogto  
Sida dumar rag kale loo jantoo loo jimiimicayo  
Macsii inad la jaar tahay ayaan kaaga jeensadaye

Waartigayaga jiif inan ku dilo amase jaad doonka  
Jaahwareer marqaan iyo dubaab jaynafkiyo taaha  
Midna inanan jerinayn ayaan kaaga jeensadaye

Maskaxdiyo jirkoo idil inuu jaa'ifa ugeysto  
Jaahoo qayiran iyo ilkaha midabka jaahuurka  
Jafaliilka iyo Foolxumaan kaaga jeensadaye

Meel jiqoo ciriiroo haddana qaacu sare joogo  
Haddii jaallahaa Qaaxo qaba aad lacuni jaadka  
Jirro inay ku fidi yaan darteed kaaga jeensadaye

Johra iyo Jamaad iyo sidaad Cadar la soo joogtey  
Adigoon jimaac gelin asaan dumar la jaan qaadin  
Minadaa jilbaha qoysey baan kaaga jeensadey

Jameeciyo salaad waa ka tegey jaad nin laasimaye  
Hayeeshee Jumciyo Ciidabay mararse joogaane  
Jahannama ka baqitaan ayaan kaaga jeensadaye

Jirri baad dhaqaalaha ku tahay goor la joogaba-e  
Janaan ad waashay mooyee qof kale kuuma qabo jeele  
Jirra faafta inad tahay ayaan kaaga jeensadaye

Bulsho aad dhexjoogtaa akhlaaq malaha jaadowe  
Jawaanada haddii gaari sidey jalawdi soo yeerto  
Dumarkaa jilbaha qaawan baan kaaga jeensadaye

Anoo lacag jiriida ah watiyo dollar kala jaad ah  
Wax jidiinka ii mari karoo jimicle mooyaane  
Caleen inanan siin jilicsan baan kaaga jeensadaye

Jiciir kama biqiyo ceeb qofkii jaad deydeyayaaye  
Haddii jeer la moogyahay qalbigu jiifka qaban waaye  
Jeeqaaqid jeeb ruux kalaan kaaga jeensaday

Dadka jaadba jaadbuu fahmaa waana kala jaade  
Jeneraal diraysliyo ciyaal jalabutaynaaya  
Fikirkooda kalajeeda baan kaaga jeensadaye

Inaan geedo jalamsado haddii la igu jaanjaamey  
Inigoon jawaan lacaga bixin deynna jerinaynin  
Jaleelada inaan heli karaan kaaga jeensadaye

Raggii jalamsigaagiyo jeclaa jaadow cuniddaadu  
Badankoodi kaa jare naftoo kaa jadeer wece'e  
Wixii \*Jaamac Nuux kugu nacaan kaaga jeensadaye

MMX Gaani  
22/03/07, Galkacyo  
Tel :755782

**NB. \*Waa Jaamac Nuux Cawdgale oo hadda ka hor ayuu tiriye gabay ku bilaabanayey  
Jeeb mariye Jaadow waxaan kaa isaga joojey...**